

TALOOYIN KU SAABSAN YAANYADA


Tamaandho ama yaanyadu waa waxa ay ugu jecel yihiin beeraley badan oo khudaar tacbada Waqooyi Bari xagaaga. Waxaa markii ugu horreysay beeran jiray kooxaha asaliga ah ee u dhow dhul baraha taasoo macnaheedu yahay inay u baahan tahay if badan oo kan qorraxda ah iyo biyo badan. Fiiri macluumaadka hoose si aad wax badan uga barato!

NOOCYADA YAANYADA

Tixgeli inaad doorato noocyada yaanyada ee aad beeranayso iyadoo ku saleysan sida aad u jeceshahay inaad u isticmaasho yaanyadaada.

Waxaa jira afar qaybood oo yaanyo ah:

- **CHERRY**- yar oo macaan leh dhadhan aad u xooggana leh, aad u fiican in lagu cuno ceeriin iyo in lala cuno saladhka oo lagu darsado
- **PASTE**- oo sidoo kale loo yaqaan "tamaandhada plum," waxay ku fiican tahay samaynta suugada yaanyada, waa yaanyo tan kale ka qallayl badan oo ka buurbuuran
- **SLICING**- waxaa badanaa ay leedahay qaab isku wada mid ah oo wareegsan oo badanaa waxaa la dhex galiyaa sandwiches-ka waxaana lagu darsadaa salarka
- **BEEFSTEAK NOOCA LOO YAQAANO AMA JIIRKA LO'DA**- qaabkeedu waa afar gees dhinac u dheer waxayna leedahay dhadhan xooggan



BILAABIDDA

- **KABILAABIDDA GUDAHA:** Maadaama yaanyadu kasoo askuntay meelo u dhow dhulbaraha, waxay u baahan tahay diirimaad badan si ay u korto. Haddii aad jeclaan lahayd inaad yaanyadaada ka bilowdo abuur, waxaad u baahan doontaa inaad yaanyadaada ka bilowdo gudaha guriga ama meel xiran. Ku bilow oo abuur yaanyada Maarso si aad u siiso waqtiga ku habboon oo ay uga baxayso deegaan diirran dhexdiisa.
- **DARYEELKA HORE:** Hubi in dhirtaadu ay ku jiraan dheryo cabbirkoodu habboon yahay. Markay koraan, waa inaad u wareejiso dheryo waaweyn. Dabayaaqada Abriil iyo horraanta Maajo ama Mey, billow inaad yarayso biyaha iyo bacriminta aad ku shubayso dhirta. Tani waxay ka caawin doontaa inay u diyaargaroobaan jawiga dibadda.
- **MEEL KALE KU TALLAALID:** Caadiyan, diirimaad ku filan ayaa la helaa dabayaaqada Meey ama Maajo iyo horraanta Juunyo oo waxaad u rari kartaa dhirtaada yaanyada dibadda. Haddii aad meel kale ku tallaashid geedahaaga yaanyada waqti hore oo xilliga ka tirsan, qaboowga ayaa dhib u geysan kara geedaha yaanyada oo ragaadin kara koritaankooda.




SIFOOYINKA KORITAANKA

Tamaandhadu waxay leedahay laba nooc oo kala duwan oo qaababka koritaanka ah:

- **TIXGALI** in geedaha yaanyadu leeyihiin qaab korriin oo u eg kan geedaha oo sii dhuudhuubta markii ay gaaraan dhererka afar ilaa shan fiid. Yaanyada markii sida geedaha kale loo tixgaliyo waxay ku bislaataa dhammanteed isku waqti qiyaas ahaan.
- **HADDII AAN LOO TIXGALIN** geedaha yaanyadu way wadaan koritaanka iyo soo saaridda yaanyada ilaa uu ka xaddido beeraleygu ama hawadu xaddido. Aad ayay u dheeraadaan mana lahan dheerar cayiman.

HABDHAQANNADA KORITAANKA



A. WARAABINTA: Geedaha yaanyadu waxay qiyaastii u baahan yihiin hal inji oo biyo ah asbuucii. Biyo aad u badan ayaa sababi kara in dhirtu dillaacdo. Sidoo kale, isku day in aad ka fogaato waraabinta caleemaha ama ciidda inaad ku daadiso si cudur uusan ugu dhicin.

B. BACRIMIN: Kudar bacrimiye, kombosti, ama bacrimiye kalluun laga sameeyay, dhawr jeer xilliga tabaca inta lagu jiro. Yaanyada, waxaa faa'iido leh inaad isticmaasho bacriminta leh 5 qaybood oo nitrogen ah, 10 qaybood oo fosfooraska ah, 5 qaybood oo potassium ah (5-10-5) haddii ay suurto gal tahay.

C. BAAR KA JARID: Kajar laamaha dhinaca ka soo baxa inta u dhexeysa jirida weyn iyo laamaha caleenta ama ka jar dhammaan laamaha dhinaca wixii ka hooseeya ubaxyada ugu horreeya. Ayadoo baar ka jarid ay dhimi karto inta yaanyo soo dhalanaysa, waxay xoojin kartaa qaab dhismeedka geedkaaga, waxay kordhin kartaa yaanyada kasoo baxaysa geedka inta ay weynan le'eg tahay, waxay yareyn kartaa suurto galnimada in cudur uu geedka ku dhaco waxayna kordhin kartaa qulqulka hawada soo gaareysa geedkaaga.

D. TOOSIN: Si aad u taageerto dhirtaada oo aad uga ilaaliso caleenta yaanyada dhulka, isticmaal qafis ama wax aad ku toosinayso ama sare ugu qaadeyso si aad u taageerto dhirtaada.

Isha xogtaan laga soo qaatay waa: NYC Parks GreenThumb, Cornell Cooperative Extension. Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden.